



## Waxaa la keenidoonaa dhimashadii oo u eg wan galaalan

Abii Saciid Alkhudri Allaha ka rali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: wuxuu yiri Rasuulka Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate: Waxaa la keenidoonaa dhimashadii oo u eg wan galaalan, mid dhawaaqa ayaa ku dhawaaqin: dadka janadow, qoortaasay kor u soo istaagin oo soo fiirin wuxuu oran: ma garanaysaan kan? waxay oran: haa, waa dhimashadii, wayna soo wada arkeen, hadana wuu dhawaaqin, kuwa naarta ku suganow, wayna soo qoor taagayaan waana soo eegayaan, wuxuu ku oran: ma garanaysaan kan? waxay oran: haa, waa dhimashadii, wayna wada arkeen, markaasaa la gawricin, ka dib wuxuu oran: kuwiina janada ku suganow waa waarid oo dhimasho ma jirto, kuwiina naarta ku suganow waa waarid oo dhimasho ma jirto, mar kaasuu akhriyin Ayada: {Nabiyow uga dig maalinta shalaytada iyadoo la go'aamiyey arinkooda iyagoo qaflad ku sugan} [surada maryam:39], kuwaas qaflada ku sugani waa kuwa aduunka jooga { iyagu Ilaahay ma ay rumayn} [maryam:39].

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabiga naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu cadeeyey in mawtka la keenidoono maalinta qiyaamaha isagoo u eg idaha labkooda oo leh midab cadaan iyo madaw ah . Waa loo dhawaaqin: kuwiina janada ku suganow! waxay taagayaan luqunta iyo madaxa wayna soo fiirin. wuxuu iyaga ku oran: ma garanaysaan kan? Waxay oran: haa, kani waa dhimashadii, wayna wada arkeen oo garteen. Ka dib waxaa dhawaaqin kii dhawaaqayey: kuwiina naarta ku suganow, xagiisa ayey luquntooda u soo taagin iyagoo madaxyadooda kor u qaadaya soona fiirinaya, Wuxuu ku oran: ma taqaanaan kan? Waxay oran: haa, kani dhimashadii wayna wada arkeen. Waa la gowracin, ka dib kii dhawaaqayey wuxuu oran: kuwiina janada ku suganow waligiin waad ku baaqi ahaanaysaan oo dhimasho ma jirto, kuwiina naarta ku suganow waligiin waad ku baaqi ahaanaysaan oo dhimasho ma jirto. Taasi waa si ay u noqoto mid u siyaadiysa muuminiinta nicmada gaaladana ugu siyaadisa ciqaabka. Nabiga naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate ka dib wuu akhriyey: {Nabiyow uga dig maalinta shalaytada, xili la go'aamiyey arinkooda iyagoo qaflad ku jira oo aan rumasnayn}. Maalinta qiyaamaha waa la kala saarin dadka janada galaya iyo kuwa naarta galaya, mid kastana wuxuu galayaa mida uu helay isagoo ku waaraayo. wuxuu ka shalaynayaa oo ka qoomamaynayaa kii xumaanta falay inuusan wanaag samayn, kii ka gaabiyey khayrkana wuxuu ka shalaayin inuusan khayrka badsan.

النجاة الخيرية  
ALNAJAT CHARITY

